



## Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Datuurka

---

### Mawduuca Labaad

#### Dulmar ku saabsan Mawduuca: Hannaanka Hal-abuur ee Ballaarinta Gaarista Caddaaladda:

Qaabka cadaaladda Soomaaliya waxaa qaabeeya isku dhaf hodan ah oo ka kooban hay'ado rasmi ah, habab dhaqameed, iyo dhaqammo bulsheed oo muddo dheer xambaarsanaa mas'uuliyadda xallinta khilaafaadka. Maanta, shacabka weli waxay wajahayaan caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin wacyi la'aan, masaafada juquraafiyeed, kharashka, dib u dhac, iyo xaddidaadda awoodda hay'adeed. Isla markaas, isdhexgalka u dhexeeya nidaamyada cadaaladda rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn weli ma aha mid isku dheelitiran, iyadoo farqiyadu saameynayaan caddaalada, joogtaynta, iyo kalsoonida shacabka.

Marka dalka uu u gudbayo aragti cadaaladeed oo mideysan oo ku saleysan dadka, xilligu wuxuu u baahan yahay isku-dubbarid maskaxeed, iswaafajin, iyo dib-u-habeyn isku xiran. Tani waxay u baahan tahay isku-xirka dhaqanka iyo casriyeynta, xoojinta iskaashiga hay'adaha, iyo qaadashada teknolijiyadda sidii aalad isbeddel. Casharradii ilaa hadda la bartay waxay bixiyaan cadeyn iyo fursadba. Iyada oo la hagaajinayo isku-xirka, la dejinayo heerar wadajir ah, iyo la hirgelinayo hal-abuurnimada dijitaalka ah, Soomaaliya waxay dhisi kartaa nidaam cadaaladeed oo si fudud loo heli karo, isku dhafan, oo ka jawaabaya xaqiiqooyinka nolosha ee shacabka.

### Su'aalaha ugu Muhiimsan Dooda

1. Waa maxay caqabadaha ugu waaweyn ee ka hor istaagaya shacabka helitaanka cadaaladda, sideese hay'aduhu uga jawaabi karaan caqabadahaas heer qaran iyo heer bulsho labadaba?
2. Xaggee ayay nidaamyada cadaaladda rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn si wax ku ool ah isku dhexgalaan, xaggee se ayay ka muuqdaan firaqiyada u baahan buuxinta qaabaysan ee midaysan?
3. Waa maxay tallaabooyinka wax ku oolka ah ee la qaadi karo si loo dhexgaliyo loona mideeyo nidaamyadan, iyadoo la ilaalinayo kalsoonida bulshada isla markaana la hubinayo caddaalada, ilaalinta xuquuqda, iyo isku-dhafka hay'adaha?
4. Maxaa cashirro ah oo ay ka barten dadaalladii ugu dambeeyey ee isku-xirka ku saabsan iskaashiga u dhexeeya hay'adaha cadaaladda, sideese teknolijiyadda loogu adeegsan karaa xoojinta wadaagista macluumaadka, bixinta adeegyada, iyo isla xisaabtanka?

